HIGHER EDUCATION COORDINATING COMMISSION
3225 25th Street SE, Salem, OR 97302
www.oregon.gov/HigherEd

# QALABKA WACYAGELINTA ARDAYDA WAAWEYN EE OREGON: QAABKA FARIINTA

Janaayo, 2021

## Macluumaadka Guud: Deeqda Iskaashiga TIE

Qalabkan wacyagelinta loo isticmaalo waxaa uu qeyb ka yahay Deeqda Hibada, Hal-abuurka, iyo Sinnaanta ee Iskaashiga (TIE) kaas oo lagu abaalmariyey Guddiga Iskuduwida Tacliinta Sare ee Gobolka Oregon (HECC) waxaana ku abaalmarisay Lumina Foundation markay ahayd 2018 si gacan looga gaysto baabi'inta kala duwanaanshaha heerarka guusha dugsiga ka dib ah ee u dhexeeysa guud ahaan ardayda Oregon iyo ardayda taariikh ahaan laga tirada badan yahay. Qalabka waxaa abuuray Pyramid Communications, oo ah qandaraasle ay ganacsi la gashay HECC sanadkii 2020, iyadoo la tashaneysa shaqaalaha HECC.

Deeqdani waxaa lagu taageeraa hawlaha hoggaanka gobolka ee loogu talagalay in lagu hormariyo guusha dugsiga sare ee Oregon ee ardayda Afrikaanka-Marayanka ah, Isbaanishka/Latinx, Mareykanka Dhaladka ah/Alaska Dhaladka ah, iyo Hawaiyii Dhaladka ah/kuwa Ka Soo Jeeda Jasiirada Baasifigga, taas si gaar ah diiradda loogu saarayo ardayda waawaayn ee ka soo jeeda bulshooyinka midabka leh .

## Macluumaad Ku Saabsan Qalabkan

Ujeedada qalabkan ayaa ah inuu ka caawiyo hay'adaha inay horumariyaan wacyagelinta ardayda waaweyn ee ka soo jeeda bulshooyinka laga tirada badan yahay ee midabka leh iyadoo la gaarsiinayo farriinta iyo talooyin ku saabsan yareynta caqabadaha diiwaangelinta iyo dhammaystirka, beddelaadda sheekooyinka ka niyad-jabinaya ardayda waaweyn inay codsadaan, iyo kobcinta xeeladaha sii haynta.

Farriinta hoos ku qoran waxay ka hadlaysaa xoogga ardayda kartida leh iyo waxa ay tahay inay helaan ama bixiyaan, iyadoo sidoo kale wax laga qabanayo qaar ka mid ah caqabadaha ay ardayda waaweyn ee ka soo jeeda bulshooyinka midabka leh ku soo gubiyeen warbixin ay soo diyaartay HECC, “Sahaminta Khibradaha Waxbarashada Dugsiga Sare ee Ardayda Waaweyn ee ka soo jeeda Bulshooyinka Midabka ee Oregon”.

In kasta oo farriin diris kaligeed aysan meesha ka saari karin caqabadaha nidaamiga ah, farriimahan ayaa ujeedkoodu yahay in wax looga qabto qaar ka mid ah walaacyada la muujiyey, inay gacan ka geystaan caadiyeynta jidadka aan toosnayn, iyo inay horumariyaan natiijooyin loo siman yahay. Hay'adaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay doortaan fariimaha ku habboon baahidooda iyo dhagaystayaashooda, una qaabeeyaan qaab ay kaga hadli karaan adeegyada ay u fidinayaan ardayda waaweyn ka soo jeeda bulshooyinka midabka leh.

## Fariimaha xaaladaha daran

*Fariimaha hoose waxay ujeedadoodu tahay in wax looga qabto walaacyada guud ee ay muujiyeen ardayda waaweyn ee ka soo jeeda bulshooyinka midabka. Isku soo wada duuboo, lixdaan farriimood ayaa abuuraya sheeko. Isku wada isticmaal iyaga oo wadajir ah ama keli-keli u isticmaal. U habeey qaab ku haboon hay'addaada oo ku dar wixii wacyigelin ah oo kuu gaar ah (la xiriir la-taliyahaaga, booqo boggayaga internetka, codso maanta, iwm).*

- **Waxaa jira barnaamij kulleej ama tababar ah oo adiga diyaar kuu ah.** Meel kasta oo aad ka joogto noloshaada, waxaa jira barnaamij kaa caawin kara buuxinta baahiyahaaga. Baahidan waxay noqon kartaa wax kasta laga bilaabo shahaadada xirfadeed ilaa tababar shaqo iyo ilaa digrii laba sano ama afar sano ah iyo ilaa Ph.D.

- **Digrii ama shahaado ayaa sare u qaadi kara shaqadaada iyo dakhligaaga.** Kuleejka saxda ah ama barnaamijka tababarka ee saxda ah ayaa kaa caawin karta inaad hesho shaqo mushahar fiican lagu qaato, inaad hormar ka samayso shaqadaada hadda, ama inaad bilowdo shaqo cusub.

- **Kuleejka iyo tababbarku waxay la jaan qaadi karaan noloshaada iyo jadwalkaaga.** Kuleejyada bulshada iyo jaamacadaha Oregon intooda badan waxay bixiyaan koorsooyin onlayn ah, waxay goobo waxbarasho ku leeyihiin gobolka oo dhan, waxayna bixiyaan barnaamijyo waqti-dhiman ama waqti-buuxa ah oo daboola baahiyahaaga.

- **Caawimaadda maaliyadeed waxay waxbarashadaada ka dhigi kartaa mid aad awoodi karto inaad iska bixiso.** Deeqaha waxbarasho iyo deeqo kale ayaa la heli karaa si ay kaaga caawiyaan inaad iska bixin karto lacagaha waxbarashada, buugaagta, iyo kharashyada kale.

- **Kuleej iyo tababbar ayaa halkan kuugu diyaar ah - haddii aad dib u bilaabeysid ama haddii aad hadda uun bilaabeysidba.**
  Marna ma jirto wax la dhaho waan ka daahay kasbashada digrii ama shahaado, ama inaad dhamaysato barnaamij tababar ah! Waxaa laga yaabaa inaad bilowday, laakiin aadan dhamayn. Waxaa laga yaabaa inaad tixgelisay inaad codsato, laakiin aad ku fakartay in adiga aan laguugu talagelin. Waddo kasta oo aad qaado, waxaad haysataa xulashooyin.

- **Ma jirto hal wado oo keliya oo aad ku noqon karto arday kuleej. Raadi wadada kugu haboon adiga.** Shaqaalaha kuleejku waxay kaa caawin karaan inaad doorato barnaamijka kuugu fiican, inaad hesho xulashooyinka kaalmada maaliyadeed, inaad ogaato sida buundooyinkii hore loo soo wareejin karo, oo inaad dhamaysato digriigaaga ama shahaadadaada.

## Ku Darista COVID-19

*Fariimahan waxaa loola jeedaa in wax looga qabto xaqiiqada cusub ee COVID-19 inoo abuuray dhamaanteen. Waxaa loo habeyn karaa oo wax loogu dari karaa farriinta xaalada guud hadba sida ugu habboon.*

- **Kuleejyada waxay halkan diyaar ugu yihiin inay daboolaan baahiyahaaga inta lagu jiro cudurka faafa ee COVID-19 iyo wixii ka dambeeya.** Waxaan bixinaa barnaamijyo iyo fursado kala duwan, haddii aad rabto inaad kasbato digriigaaga ama aad yeelato xirfado si aad fursadooyinka shaqo ugu soo weeciso dhankaaga.

- **Fasallada khadka tooska ah iyo kuwa onlaynka ah ayaa ka dhigi kara kuleejka mid la gaari karo.** Inta aan ka shaqeyneyno la qabsiga nolosheena cusub, kuleejyada iyo barnaamijyada tababarka waxaa loo bedelayaa khadka tooska ah. Taas macnaheedu waxa weeye haddii aad hesho kombuyuutar iyo khad internet ah inaad dhammaysan karto waxbarashaddaada ama tababarkaaga.

- **Caawinaad lacageed ayaa wali la heli karaa inta lagu guda jiro cudurkan faafa iyo kadib intaba.** COVID-19 wuxuu aduunkaan ka abuuray hubin la'aan badan. Laakiin, weli waxaad heli kartaa deeqo waxbarasho, deeqo kale, iyo kaalmooyin kale oo maaliyadeed si aad u dhammaystirto kulleejada, barnaamijyada shahaadada, ama tababarada-haddii ay noqoto mid qof ahaan looga xaadiro ama mid khadka tooska ah laga barto.

## Fariinta Dhageystayaasha Kala Duwan

*Fariimahani waxay la hadlayaan dhagaystayaal kala duwan waxayna ujeedadoodu tahay inay ka hadlaan dareenka lahaanshaha. Dooro farriinta sida ugu fiican kuugu habboon, u qaabeey qaab ku haboon hay'addaada, kuna dar wacyagelinta adiga kuu gaarka ah.*

- Ma jirto hal wado oo keliya oo aad ku noqon karto arday kuleej. Taasi waa sababta aan ugu dadaalno inaan abuurno dhaqan ka-mid noqosho oo qof walba dareemo inuu ka tirsan yahay kana guul gaari karo kuleejka.

- Waad ku guuleysan kartaa kuleejka. Waxaad yeelan kartaa hibooyin aad dadka la wadaagto, waxaana jira kulleejo ama barnaamij tababar oo kaa caawin kara inaad sida ugu badan uga faa'iideysato hibooyinkaas.

- Waxaa jira barnaamij kulleej ama tababar ah oo adiga diyaar kuu ah. Haddii aad haysato digrii ama shahaado, waxaad heli kartaa shaqo fiican oo waxaad kasban kartaa lacag badan.

- Waad ku guuleysan kartaa kuleejka. Waan kaa caawin doonaa inaad halkaas gaarto. Iyada oo la isticmaalayo deeq waxbarasho, umeerin, la talin, iyo adeegyada kale ee ardayda sida daryeelka caafimaadka, waxaad heli kartaa taageerada aad u baahan tahay si aad u hesho digrii ama shahaado.

- Waxaad dhiirrigelin doontaa carruurtaada, qoyskaaga, iyo bulshadaada markaad raadsato digrii ama shahaado. Adigoo galaya kuleej ama tababar waxaad qaban kartaa wax badan waxaadna noqon kartaa wax badan.

## Fariinta dhagaystayaasha

*Farriimahani waxay si toos ah uga hadlayaan walaacyada ay qabaan dhagaystayaal gaarka ah. Dooro farriinta sida ugu fiican kuugu habboon, u qaabeey qaab ku haboon hay'addaada, kuna dar wacyagelinta adiga kuu gaarka ah.*

**Loogu talagalay waalidiinta iyo dadka ardayda masuulka ka ah:**

- Haa, waxaad noqon kartaa waalid ama masuul *iyo* sidoo kale arday. Kuleejyada bulshada iyo jaamacadaha dadweynaha ee Oregon waxay bixiyaan barnaamijyo tababar ama koorsooyin khadka tooska ah iyo onlay ku baxa, waxay goobo waxbarasho ku leeyihiin gobolka oo dhan, waxayna bixiyaan fursado waqti-dhiman iyo waqti-buuxa ah oo kaa caawinaya inaad hesho digrii ama shahaado.

- Waad ogtahay in waxbarashada carruurtaadu ay muhiim tahay. Waxbarashadaadana waa sidoo kale. Waxaad hogaan ka noqon kartaa wadada aad ku heli lahayd digriiga ama shahaadadaada. Goobaha kaambaska ee gobolka iyo koorsooyinka khadka tooska ah waxay suurtogal ka dhigayaan in aad kasbato shahaadooyin.

- Waxaad dhiirrigelin doontaa carruurtaada, qoyskaaga, iyo bulshadaada markaad raadsato digrii ama shahaado. Gelitaanka kuleej ama tababar waxaad nasiibsan kartaa fursado xirfadeed oo horey kuu dhaqaajinaya.

**Loogu talagalay ardayda isdiiwaangelisey kadibna iska tegey**
*Farriimahan ayaa noqonaya kuwa ugu fiican haddii la dhaqangeliyo oo la habeeyo iyadoo lagu saleynayo barnaamijyada iyo deeqaha hay'adda.*

- Ma heysataa buundooyin kulliyadeed laakiin shahaado la'aan ma tahay? Marnaba lagama habsaamin in la dhammeeystiro. Raadi sida buundooyinka loogu wareejin karo kuleejka bulshada Oregon ama jaamacadda dadweynaha.

- Marnaba lagama habsaamin in la dhammeeystiro kuleej! Haddii aad horey u qaadatay koorso kuleej, raadi sida buundooyinka loogu wareejin karo kuleejka bulshada Oregon ama jaamacadda dadweynaha.

- Ma dooneysaa inaad wareejisato? Ka faa'iideyso buundooyinkaaga kuleejka! Ogow sida buundooyinka loogu wareejin karo jaamacadda dadweynaha Oregon oo aadna u dhammaystiran karto digriigaaga ama shahaadadaada.

- Weli waad dhameysan kartaa waxbarashadaada. Haddii aad qabto buundooyin hore, waxaad u isticmaali kartaa inaad ku hesho digriiga kuleejka ama shahaado taasoo kuu horseedi karta shaqo mushahar fiican leh.

- Ma tixgelinaysaa ku laabashada dugsiga? Shaqaalaha kulleejka ayaa kaa caawin karaan inaad marto habraaca wareejinta buundooyinkaaga, koorsooyinka aad qaadanaysid, iyo sida loo helo kaalmada dhaqaale ee lagu taageerayo waxbarashadaada.

**Loogu talagalay kuwa aan waligood is diiwaangelinin:**

- Waxaa jira xulashooyin aad u tiro badan oo loogu talagalay tababarka iyo waxbarashada, laga bilaabo tababar shaqo ilaa shahaadooyin xirfadeed illaa digrii laba iyo afar sano ah iyo illaa PhD. Hel barnaamijka saxda ah ee kaa caawinaya inaad hesho xirfadda shaqo ee aad rabto.

- Waxaa jira barnaamij kulleej ama tababar ah oo adiga lagugu talagalay. Isku diyaari xirfada shaqo ee aad rabto, iyadoo ay jiraan xulashooyin badan laga bilaabo tababar shaqo ilaa shahaadooyin xirfadeed illaa digrii laba iyo afar sano ah iyo illaa Shahaado sare.

- Digriigaaga ayaa laga yaabaa inuu kaaga dhowdahay sida aad moodid. Haddii aad hesho caawinaad lacageed, jadwallo dabacsan, iyo xulashooyin badan oo digrii iyo shahaadooyin ah, waxaa laga yaabaa inaad ku dul degto xirfada shaqo ee aad rabto.

- Waxaad buundooyin kuleej ku heli kartaa waxyaaba aad horey u taqaanay. Adiga buundooyinka ka helaya waxbarashadii hore, digriigaaga ama shahaadadaadu way kaaga soo dhowdahay sidii hore.

- Koorsooyinka kulleejadu waa inay kuu noqdaan kuwa ku tartarn geliya! Inaad codsato kuleejka maahan inay caqabad kugu noqoto. Waxaan kuu fududeyneynaa inaad bilowdo oo aan kugu taageerno safarkaaga kuleejka si aad u dhammaystirto waxbarashadaada oo aad u hesho digriigaaga ama shahaadadaada.

**Ardayda aan sharciyeysnayn:**

- Waxaa jira xulashooyin gargaar lacageed oo loogu talagalay ardayda aan sharciyeysnayn iyo ardayda DACA. Oregon, waxaa laga yaabaa in laguu ogolaado barnaamijyada kaalmada maaliyadeed ee gobolka. Sahmin ku sameey xulashooyinkaaga, ay ka mid tahay soo gudbinta Codsiga Gargaarka Ardayda ee Oregon (ORSAA).

## Mowduuca fariimaha

*Farriimahani waxay si qoto dheer ugu hadlayaan qaar ka mid ah caqabadaha waaweyn iyo walaacyda ay muujiyeen ardayga waaweyn ee ka soo jeeda bulshooyinka midabka leh. Mowduuc kasta wuxuu leeyahay aragtiyo kala duwan sidaas darteed waaxaad dooran kartaa farriinta sida ugu fiican kuugu habboon, u qaabeey qaab ku haboon hay'addaada, kuna dar wacyagelinta adiga kuu gaarka ah.*

**Xiriirka ka dhaxeeya shaqada/iskuulka:**

- Ma doonaysaa inaad horumariso xirfaddaada adigoo shaqeynaya? Tababbarka, shahaadada, ama barnaamijka kuleejka ee saxda ah ayaa kaa caawin kara inaad gaarto halkaad rabto. Xulashooyinka dabacsan waxay ka dhigan tahay inaad wax ka baran karto khadka tooska ah ama inaad aadi karto dugsiga waqti-dhiman si aad shaqada u sii wadato.

- Tababbarka saxda ah ama waxbarashadu saxda ah waxay kaa caawin karaan inaad hesho shaqo mushahar fiican lagu qaato- haddii ay tahay shahaado jaamacadeed ama barnaamij shahaado ku bixiya 10-usbuuc.

- Ma xiiseyneysaa inaad si dhakhso leh uga kobacdo shaqadaada? Barnaamijka saxda ah ee digriiga ama shahaadada ayaa ku caawin kara. Xulashooyinka dabacsan waxay ka dhigan tahay inaad wax ka baran karto khadka tooska ah ama inaad aadi karto dugsiga waqti-dhiman si aad shaqada u sii wadato.

- Inaad kasbato shahaadada ama digriiga kuleejka waxay kuu horseedi kartaa mushahar fiican, waxay yareyn kartaa halista ah inaad shaqo la'aan noqoto, waxayna ku siin kartaa dhaq-dhaqaaq dhaqaale oo fiican. Digrii ama shahaado ayaa kaa caawin karta inaad hesho xirfad shaqo oo aad mushahar fiican ku qaadan karto waxayna adiga, qoyskaaga, bulshadaada idinka kaa caawin kartaa inaad guuleysataan.

**Walaacyada dhaqaale:**

- Miyaad ka walwalsan tahay inaad iska bixin karto kharashaadka kuleejka? Waxaad haysataa xulashooyin aad ku suurta gelin karto. Deeqaha waxbarasho iyo deeqaha kale ayaa kaa caawin kara inaad iska bixiso kharashaadka waxbarashadaada ama tababarkaaga si aad u hesho shaqo mushahar fiican lagu qaato.

- Gargaar maaliyadeed ayaa la heli karaa si ay kaaga caawiso inaad hesho digriiga ama shahaadada kuleejka. Ogow xulashooyinka la heli karo ee kaa caawin kara inaad iska bixiso kharashaadka waxbarashadaada.

- Kahor intaadan gaarin go'aanka ugu dambeeya ee ku saabsan kuleejka ama barnaamijka tababarka, waqti ku qaado inaad wax ka ogaato wadarta kharashka ku kacaya kaqeybgalka barnaamijka. Fiiri xulashooyinka kaalmada maaliyadeed ee Oregon oo samee qorshe aad wax uga qabanayso wadarta kharashyada ku kacaya barnaamijka oo gaar yoolalkaaga waxbarasho.

- Ka faa'iideyso noocyada badan ee kaalmada lacageed ah ee la heli karo! Waxaad haysataa xulashooyin kaa caawinaya inaad iska bixiso kharashyada kuleejka.
  - Sannad kasta, Gobolka Oregon wuxuu abaalmarin ka badan $100 milyan oo deeqo ah siiyaa ardayda wuxuuna maamulaa in ka badan 600 deeqo waxbarasho ah oo gaar ah. Raadi oo codso deeqaha gobolka iyo deeqaha waxbarasho ee aad u-qalanto adigoo booqanaya OregonStudentAid.gov.
  - Ha moogaanin kaalmada federaalka iyo mida gobolka. Buuxi Arjigaaga Kaalmada Federaalka ee loogu talagalay Ardayda (FAFSA) ama Arjiga Kaalmada Ardayga ee Oregon (ORSAA).
  - La hadal xafiiska kaalmada maaliyadeed ee dugsiga ama barnaamijka aad xiiseyneyso.

**Waajibaadka qoyska:**

- Waxaad u shaqeysaa si adag si aad u taageerto qoyskaaga. Haddii aad haysato digrii ama shahaado, waxaad heli kartaa shaqo mushahaar fiican leh oo waxaad wado wanaagsan u raadin kartaa qoyskaaga.

- Koorsooyinka khadka tooska ah ama onlaynka ah, goobaha kuu dhow, iyo barnaamijyada waqtiga-dhiman ah waxay la micno yihiin inaad kasban karto digrii ama shahaado kaa caawin doona inaad hesho shaqo mushahar fiican lagu qaato, adigoo weli haysta waqti aad ku daryeesho qoyskaaga.

**Helitaanka/dabacsanaanta:**

- Oregon waxay leedahay boqolaal fursado oo ah waxbarashadaada sare. Haddii aad dooneysid inaad kobacdo adigoo isticmaalayo tababarka xirfadeed, inaad kasbato shahaado, dhammaystirto shahaadada koowaad, ama aad raadsato waxbarasho qalanjebinta iyo xirfadaha, barnaamijyo badan oo kala duwan ayaa ku sugaya.

- Kumaan kun oo arday ah ayaa sanad walba u kala goosha kuleejyada iyo jaamacadaha Oregon. Ogow sida koorsooyinkaagu loogu wareejin karo iyo si aad uga faa'iideysan karto buundooyinkaaga iyo inaad ka fogaato inaad waqti iyo lacag ku bixiso koorsooyinka aan la wareejin doonin.

- Kuleejka afarta sano ah maahan xulahadaada kaliya ee loogu talagalay tacliinta sare. Waxaa jira noocyo kala duwan oo waxbarasho iyo xulashooyin tababar, laga bilaabo tababar shaqo ilaa shahaadooyin xirfadeed illaa digrii laba-iyo afar-sano ah ilaa PhD.

- Qof walba wadadiisa waxbarashado waa u gooni. Nagala hadal waxyaabaha ku saabsan koorsooyinka la qaadan karo, sida loo helo kaalmada dhaqaale, iyo wixii su'aalo ah ee aad qabto. Waxaan halkan u joognaa inaan kaa caawino inaad gaarto himilooyinkaaga waxbarasho.

### Buuxi-meelaha-ka banaan ee farriinta hay'adeed, maaddo ahaan

*Farriimahani waxay ujeedadoodu tahay in wax looga qabto tabashooyinka gaarka u ah hay'adda shakhsiyadeed oo aan si ku habboon uga hadli karin farriimaha guud. Waxay bixiyaan qeexitaan ku saabsan sida wax looga qabto tabashooyinkaas, waxaana loogu talagalay in la dhaqangeliyo loona qaabeeyo iyadoo lagu saleynayo barnaamijyada iyo deeqaha hay'adda.*

**Walaacyada dhaqaale:**

- Inaad awoodo iska bixinta kharashyada kuleejka way kuu dhowdahay. Waxaan bixinaa kaalmada maaliyadeed ee waxbarashada, buugaagta, iyo kharashyada kale. Si aad wax uga ogaato barnaamijyadayada kaalmada maaliyadeed, booqo X/la xiriir Y.

- Waxaan kaa caawin karnaa inaad iska bixisid kharashaadka waxbarashadaada ama tababarkaaga. Waxaan bixinnaa barnaamijyo kaalmo dhaqaale oo kaa caawin kara inaad iska bixiso kharashaadka waxbarashada, buugaagta, iyo kharashyada kale. Si aad wax uga ogaato barnaamijyadayada kaalmada maaliyadeed, visit X/la xiriir Y.

- In ka badan boqolkiiba XX ee ardaydayadu waxay helaan nooc ka mid ah kaalmada maaliyadeed. Si aad wax uga ogaato barnaamijyadayada kaalmada maaliyadeed, booqo X/la xiriir Y.

**Hogaamin/la-talin:**

- Codsashada kuleejka ama barnaamijka tababarka waxay ku dareensiin kartaa xoogaa cabsi ah. Laakiin, caawimaad ayaa halkan laga helaa. Waxaan kugu hagi karnaa wareejinta buundooyinka, codsashada kaalmada maaliyadeed, iyo go'aan ka gaarista barnaamijka kaa caawin doona xirfaddaada shaqo. La hadal/ la xiriir X maanta.

- Waxaan halkaan u joognaa inaan kugu hagno safarkaaga kulleejada. Waxaan kaa caawin doonaa xaqiijinta inaad dhammaystirto barnaamijkaaga oo aad hesho digriigaaga ama shahaadadaada. La hadal/la xiriir X maanta!

- Ma hubtid miyaa barnaamijka kuga habboon adiga? Ma isweydiineysaa haddii buundooyinkaaga la wareejin karo? Waxaan halkan u joognaa inaan ku caawinno. La xiriir X ama booqo Y si aad wax badan uga ogaato.

- Lataliyahaaga ayaa halkaan u jooga inuu kaa caawiyo inaad sida ugu wanaagsan uga faa'iideysato waxbarashada kuleejkaaga. La xiriir lataliyahaaga maanta si aad taageero uga hesho.

**Helitaanka/dabacsanaanta:**

- Miyaad shaqeysaa waqti-buuxa? Miyaad kala dooran la'adahay iskuulka iyo xarunta daryeelka carruurta? Waajibaad qoys miyaa ku saaran? Waxaan bixinaa xulashooyin waxbarasho oo dabacsan si aad ula jaanqaadi karto jadwalka waxbarashadaada/tababarkaaga.

- Haddii aad tahay ardayga af Ingiriisiga ama arday luqado badan ku hadla, waxaad taageero ka heli kartaa luuqadaha X.

**Baahiyaha ardayga:**

- Waan ognahay in ardayda kuwaas oo sidoo kale ah waalidiinta ama arday masuul ka ah ay u baahan yihiin inay ilmo daryeelaan iyo jadwalo koorso oo dabacsan si ay u dhamaystirtaan waxbarashadooda. Taasi waa sababta aan u bixinno X program.

- Helitaanka la talinta tacliinta, umeerinta, iyo taageero ayaa muhiim u ah ardayda si ay u guuleystaan. Dhammaan ardayda dhigata X institution waxay helaan Y services.

- Helitaanka adeegyada daryeelka caafimaadka iyo caafimaadka maskaxda ayaa muhiim u ah ardayda si ay u guuleystaan. Dhammaan ardayda dhigata X institution waxay helaan Y services.

**Barnaamijyada dhaqamada gaarka u ah:**

- Waan ognahay in dadka leh asalo kaladuwan ay leeyihiin baahiyo kaladuwan markay aadayaan iskuulka. Taasi waa sababta aan u bixino A programs ee loogu talagalay ardayda ka soo jeeda Y background/race/ethnicity.

- Waxaan waaxda waxbarasho ee kala duwan ku haynaa macalimiin iyo shaqaale. Boqolkiiba X ee shaqaalaheenna iyo macallimiinteennu waxay isku aqoonsadaan inay yihiin Madow, Dadka Asalka ah, iyo Dad Midab leh.

- Waxaan ku dadaaleynaa inaan abuurno dhaqanka kambaska ee ka mid noqoshada ah. Waxaan arrintaas ku gaarnaa X.